GLOBAL INITIATIVE
AGAINST TRANSNATIONAL ORGANIZED CRIME

# IL HEESHIISKA AMNIGA EE LA WADAAGO

## TALO SOO JEEDINTA LAGU HORUMARINAAYO BADBAADADA BULSHADA SOOMAALIYEED EE KU NOOL EASTLEIGH, NAIROBI

LUULYO 2026

NORTHERN ADVOCACY ORGANIZATION

KACPEN
KAMUKUNJI COMMUNITY PEACE NETWORK
Local Communities. Local Solutions


UK International Development
Partnership | Progress | Prosperity

© 2026 Global Initiative Against Transnational Organized Crime.
Dhammaan xuquuqda way xifdisan yihiin.

Ma jirto qeyb ka mid ah daabacaaddaan oo la soo saari karo ama laguma gudbin karo qaab kasta ama si kasta iyadoo aan oggolaansho qoraal laga heysanin the Global Initiative.

Bogga kore: © *Billy Mutai/SOPA Images/LightRocket via Getty Images*

Fadlaan su'aalaha u gudbi:
The Global Initiative Against Transnational Organized Crime
Avenue de France 23
Geneva, CH-1202
Switzerland
www.globalinitiative.net




# HORDHAC

Eastleigh, oo ah hoyga bulshada Soomaaliyeed ee Nairobi intooda badan, waa xafad leh kala duwanaasho badan. Inkasta oo ay tahay mid ka mid ah xarumaha ganacsiga ee ugu horumarsan ee caasimadda Kenya, haddana waxa si weyn u saameeya caqabado amni oo ay ka mid yihiin ciyaal weerada iyo boobka dhulalka, tahriibinta iyo ka ganacsiga dadka, iyo xiriirka ka dhexeeya bulshada iyo booliska oo aan wanaagsaneyn.

Dukumeentigaan, *Heshiiska Amniga La Wadaago (the Shared Security Pact)*, wuxuu jeedinaayaa talooyin wax looga qabanaayo caqabadaha soo jireenka ah ee amniga magaalooyinka. Talooyinkaan waxay ku saleysan yihiin dood-wareedyo la abaabulay oo ka mid ahaa mashruuca Wadahadalka Amniga La Wadaago (Shared Security Dialogues), kaas oo ay maalgelisay Xafiiska Arrimaha Dibedda, Barwaaqo-sooranka iyo Horumarinta ee Boqortooyada Ingiriiska. Mashruuca wuxuu isu keenay labo koox oo aan inta badan isdhexgalin oo arrimha amniga na ka eega dhinacyo kala duwan. Inta u dhexeysay Nofeembar 2025-ti iyo Febraayo 2026-da, shan wadahadal ayaa la qabtay si loo aqoonsado caqabadaha loona helo xalal kor loogu qaadaayo badbaadada magaalada looga na hortago rabshadaha bulshada dhexdeeda. Ka qeybgalayaasha waxaa ka mid ahaa wakiilo ka socda hay'adaha sharci-fullinta iyo dowladda, iyo sidoo kale xubno ka tirsan bulshada rayyidka ee Eastleigh, oo ay ka mid yihiin ururrada bulshada, dadka deegaanka, iyo qaxootida Soomaaliyeed iyo jaaliyadaha barakacayaasha ah. Talo soo jeedinta siyaasadda ee ku xusan dukumeentigaan waxay si toos ah uga soo baxeen bulshada iyo wakiilada dalka ee ka qeybgalay wadahadallada.

Dukumeentigaan wuxuu la socda warbixinta siyaasadda ee 'Magaalada wejiyada kala duwan leh: Badbaadada magaalooyinka, socdaalka iyo isbeddelka cimilada iyo saameynta ay ku leeyihiin bulshada Soomaalida ee ku nool Eastleigh, Nairobi'. Warbixintaan waxya qeexeysaa dhaqdhaqaaqa gaarka ah ee dembiyada abaabulan iyo amni darrada ka jirta Eastleigh, iyo sidoo kale waxyaabaha ay sida gaarka ah ugu nugul yihiin bulshada Soomaalida ee ku nool Nairobi. Waxay tilmaameysaa dhowr caqabadood oo aas-aasi ah, oo ay ka mid yihiin rabshadaha ka yimaada ciyaal weerada, suuqyada daroogada lagu iibiyo ee sharci darrada ah, ka ganacsiga dadka (gaar ahaan looga faa'iideysto galmada) iyo tahriibinta, iyo dembiyada asalka ah sida dukumeentiyada been abuurka. Waxay sidoo kale iftiimineysaa xiriirka bulshada iyo booliska oo xumaaday kaasi oo ka dhashay takoorka, musuqmaasuqa iyo kalsooni darrada. Warbixintaan siyaasadeed ayaa lagu ogaaday in isbeddelka cimilada in ay sii kordhinayso khatarraha ka dambeeyo in dadka ay u barakacaan Nairobi, taasi oo kordhinayso in ay u nuglaadaan in laga faa'iideysto.



# TALO SOO JEEDINTA

Talooyinka hoose waxay ka jawaabayaan daldaloollada hadda ku jira bixinta adeegyada dowladda hoose, booliseynta, xiriirka u dhexeeya bulshada iyo dowladda iyo dadaallada bulshada rayyidka ah ee ka socda Eastleigh, iyadoo ujeeddadu tahay in la hagaajiyo amniga iyo in laga hortago saameynta weyn ee ka imaadda isbeddelka cimilada. Talooyinka waxaa loo qeybiyay shan mowduuc waxaana lagu koobay kuwa ay saa'iidka u taageereen ka qeybgalayaasha ka socday bulshada iyo dowladda labaduba.

## 1. Dadaallada dowladda

Ka qeybgalayaasha Wadahadallada Amniga ee La Wadaago ayaa sheegay in mas'uuliyinta dowladda hoose ee mar walbo la beddelaayo ay wiiqeyso kalsoonida bulshada; in musuqmaasuqa ka jira soo saarista dukumeentiyada uu lid ku yahay xuquuqda bulshada iyo kalsoonida ay ku qabaan dowladnimada; iyo in qaababka kale ee xallinta khilaafaadka (oo bulshada Soomaaliyeed ay u taqaano maslaxa) aysan lahayn isla xisaabtan oo aan loo isticmaalin kiisaska dembiyada culus. Talooyinka lagu hagaajinaayo xaaladdaan waxay u kala baxaan saddex qeybood:

### In la dhiso xiriir u dhexeeya bulshada iyo dowladda

- In la hubiyo joogteynta xiriirka dowladda iyo bulshada. In la magacaabo saraakiil heelan oo u xilsaaran xiriirka bulshada (hal ismaamul, hal bulsho) hal sarkaal oo u xilsaaran maamul-hoosaadkiiba oo aan la beddelaynin. In si rasmi ah loo dhaqan geliyo doorka odayaasha, maamulayaasha dhismayaasha iyo hoggaamiye-diimeedyada si ay u noqdaan xiriir joogta ah. U dood in ugu yaraan muddo xileed saddex sano ah ay Eastleigh ka shaqeeyaan saraakiisha sare ee maamulka dowladda qaranka.
- In la dhiso guddiyo wadajir ah oo heer degmo ah (oo ay ku jiraan madaxda deegaanka, odayaasha iyo wakiillada dhalinyarada/haweenka) si ay u kulmaan bil kasta oo ay dowladda ugu gudbiyaan talooyinka bulshada ee la xiriira arrimaha amniga iyo bixinta adeegyada.
- In la sameeyo boggag xil-wareejin hoggaamineed oo dhijitaal ah si loo ilaaliyo xogta hay'adaha.

### In la adeegsado nidaamyada dhijitaalka ah si loo horumariyo sinnaanta iyo hufnaanta

- Dardargelinta in dhammaan shatiyada ismaamulka, biilasha (korontada, biyaha) iyo bixinta dukumeentiyada laga dhigo dhijitaal si loo yareeyo kiisaska musuqmaasuqa ee suurtagalka ah (oo ay ka mid yihiin bixinta laaluushka) iyo dhaqamada kale ee ka faa'iideysiga ah inta lala hadlaayo dilaallada.

### In la qaato hababka dhaqameed ee caddaaladda

- Diyaari habraac gudbin ah oo ay golayaasha *maslaxa* ku maareeyaan khilaafaadka madaniga ah iyo dembiyada yaryar laakiin loo xilsaaray inay kiisaska la xiriira ka ganacsiga dadka, ka faa'iideysiga galmada, ka ganacsiga daroogada ama dembiyada rabshadaha wata u gudbiyaan nidaamka rasmiga ah ee caddaaladda.
- In odayaasha lagu tababaro xuquuqda aadanaha iyo caddeymaha. Waxay ka qeybgalayaasha isku raaceen in habka *maslaxa* uu u hoggaansamo shuruucda qaranka oo uu si rasmi ah u diiwaangeliyo dhammaan kiisaska uu qabto.
- In la abuuro diiwaan dadweyne si loo dabagalo gudbinta kiisaska laga soo bilaabo golayaasha *maslaxa* illaa booliska iyo maxkamadaha, iyadoo la horumarinaayo hufnaanta.

## 2. Dhaqamada iyo hababka booliiseynta

Ka qeybgalayaasha ayaa sheegay in takoorka bulshooyinka Soomaaliyeed ay tahay arrin ku soo laabato Eastleigh, iyo sidoo kale in saraakiisha musuqmaasuqa qaata ay bartilmaameedsadaan xubnaha bulshada. Hababka booliseynta bulshada sida habka tobanka guri ay iska war qabaan (Nyumba Kumi), inkastoo ay yihiin farsamooyin waxtar leh, haddana lama siiyo dhaqaalo ku filan waana kuwo u muuqdo in ay falcelin sameeyaan. Xubnaha bulshada waxay ku doodeen in ilaha booliska aysan joogin meelaha dhibaatooyinka badan ay ka dhacaan, iyo in awoodda baaritaan oo xaddidan ay caqabad ku tahay dacwad-qaadista waxtarka leh ee kiisaska dembiyada abaabulan.

### In dib loo habeeyo lana awood siiyo Nyumba Kumi si ay u noqoto mid firfircoon oo hufan

- In isku-duwayaasha la siiyo qalab sida taleefannada casriga ah iyo barnaamij warbixin oo ammaan ah oo loogu talogalay in dhacdooyinka islamarka dhaca loo gudbiyo booliska.
- In isku-duwayaasha Nyumba Kumi la siiyo gunnada badbaadada bulshada, lana abuuro abaalmarinnada aqoonsiga oo ku saleysan shuruudo daahfuran, si loo dhiirigeliyo ka qeybgalka.
- In kor loo qaado iskaashiga rasmiga ah ee u dhexeeya isku-duwayaasha Nyumba Kumi iyo dhiirigeliyaasha caafimaadka bulshada si loo aqoonsado loona soo gudbiyo howlaha sharci darrada ah.

### In meesha laga saaro takoorka oo kor loo qaado isla xisaabtanka hay'adaha sharci fulinta

- In la hirgeliyo tababar xirfadeed oo Khasab ah oo loogu talogalay saraakiisha booliska oo ku saabsan dhaqanka Soomaalida, xuquuqda qaxootiga iyo habka booliseynta oo tixgelinaaya dhaawaca nafsiyeed ee dadka soo gaadhay.
- In la sameeyo hay'ad ku howlan ka qeybgalka bulshada (tusaale ahaan, shirar, maalmo bandhig, xaflado ciyaaro) si ay kuwa joogta ah uga mid noqdaan howlaha booliska.
- In lagu dadaalo shaqaaleysiinta saraakiil ku hadasha af-Soomaaliga, lagana shaqeeyo sidii loo heli lahaa boolis jinsi ahaan isku dheelitaran oo ka howlgala Eastleigh.
- In la tijaabiyo kameradaha jirka lagu xirto oo ay kormeerayso Hay'adda Madaxa-bannaan ee Kormeerka Booliska iyo wakiillada bulshada.

### In la soo dhaweeyo qoondeynta ilaha booliseynta si loo kordhiyo awoodaha ka hortagga dembiyada iyo baaritaanka

- In la horumariyo shabakadaha CCTV-da oo leh cutub kormeer oo dhexe. Tan waa in lagu kabo ballaarinta shabakadaha kameradaha dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay si looga gudbo xaqiiqda hadda jirta ee ah in hoteellada ugu badan ee ku yaalla meelaha laga ganacsado aysan lahayn nidaamyada kormeerka.
- In la abuuro koox u xilsaaran dembiyada maaliyadeed iyo kuwa abaabulan oo hoos tagta Agaasinka Baarista Dembiyada si loo sameeyo baaritaanno 'daba socda lacagaha'.
- In la hirgeliyo booliseynta meelahay ay dembiyada badan ka dhacaan (oo saraakiisha booliska loo badiyo meelaha dembiyada badan ka dhacaan) iyadoo la adeegsanaayo roondooyinka lugta ama baabuurta iyo barnaamijyada saadaalinta.

## 3. Xiriirka bulshada ay la leeyihiin booliska iyo dowladda

Ka qeybgalayaasha waxay sheegeen in inkastoo dadaallo la sameeyay si loo hagaajiyo xiriirka ka dhexeeya bulshada iyo booliiska, haddana kalsooni-darrada iyo musuqmaasuqa weli ay jiraan. Musuqmaasuqu waa fududeeyaha ugu weyn ee tahriibinta dadka, dukumeentiyada been-abuurka, iyo shabakadaha bixiyo ilaalinta sharci darrada ah, taasi oo burburineysa kalsoonida lagu qabo hay'adaha iyo maamulka dowladda. Waxa kale oo uu musuqmaasuqu suurageliyaa in dembiyadaani ay is taageeraan oo ay is xoojiyaan – tusaale ahaan, dukumeentiyada been-abuurka waxay sahlaan ka ganacsiga iyo tahriibinta dadka.

### In talaabooyin la qaado si looga hortago dukumeentiyada been-abuurka

- Casriyee hababka xaqiijinta dukumeentiyada adigoo adeegsanaaya farsamooyin dhijitaal ah, sida calaamadda dhijitaalka ah (digital watermarking) ama summadaha QR (QR codes), laguna dabaqaayo dhammaan dukumeentiyada ka soo baxo ismaamulka si looga hortago been-abuurka.
- Maalgeli nidaamyada aqoonsiga bayoomitiriga, isla markaana si joogta ah u samee kormeero iyo hubin lagu sameeyo xarumaha bixinta dukumeentiyada ama adeegyada.
- Baaritaan ku samee mulkiilayaasha guryaha iyo ganacsiyada looga shakisan yahay in ay hoy u yihiin howlaha dembiyada abaabulan.
- Mulkiilayaasha guryaha ha lagu waajibiyo inay diiwaangeliyaan xogta dadka guryaha kireysanaaya, sida meesha ay ka soo jeedaan iyo macluumaadkooda aas-aasiga ah, si ay uga caawiyaan aqoonsiga.

### Ilaali badbaadada dadka soo gudbiya dembiyada iyo dhibbanayaasha

- U dood ansixinta Hindise-sharciyeedka Ilaalinta Badbaadada Dadka Soo Sheega Dembiyada.[1]
- Hubi in dadka soo sheega dembiyada la siiyo taageero ku filan, sida in la qariyo xogtooda, oo la siiyo matalaad sharci iyo ilaalo.
- Howlgeli khad talefoon oo sir ah oo shaqeeyo 24 saacadood maalintii iyo 7 maalmood usbuucii, kuna howlgala af-Soomaaliga iyo Sawaaxiliga.

## 4. Dadaallada Bulshada Rayyidka

Ururrada bulshada rayyidka ah ee Eastleigh waxaa xaddidaaya maalgelin ku saleysan mashaariic, taas oo wiiqda sii jiritaankooda iyo awooddooda ay ku yeeshaan iskaashi istraatiiji ah oo ay la sameeyaan dowladda. Sidookale, dhaqdhaqaaqayaasha waxay la kulmaan handadaad, cabsi-gelin iyo caqabado maamul oo carqaladeeya howlahooda.

### In madallada daneeyayaasha laga dhigo hannaan rasmi ah oo joogto ah

- In la sameeyo goleyaal amni oo heer sare ah oo dhaca saddexdi biloodba mar – oo isu keenaaya saraakiisha dowladda qaran, booliska, hoggaamiyeyaasha ganacsiga, Nyumba Kumi iyo ururrada bulshada rayyidka – oo ay si wadajir ah u guddoominayaan Guddoomiyaha Ismaamulka iyo oday bulsho, oo leh ajeenda horudhac oo ay soo diyaariyeen wakiillo kala duwan.
- In la abuuro gole-hoosaadyo leh mowduucyo ku saabsan tacaddiyada jinsiga, shaqaaleysiinta dhallinyarada iyo amniga ganacsiyada si qaab qooto dheer ah loo dhexgalo arrimaha waaxda.

### Caawi in la hubiyo in ururrada bulshada rayyidka ay helaan dhaqaale joogta ah

- Abuur xarun hal-abuurka nabadda ee Eastleigh si ay uga caawiso ururrada bulshada rayyidka in ay horumariyaan hannaano ganacsi bulsheed oo suurtageliya inay helaan ilo dakhli oo waara.

---

1 Eeg: Maureen Kinyanjui, *Whistleblowers to get stronger protection, rewards under new bill*, *The Eastleigh Voice*, 11 Luulyo 2025, https://eastleighvoice.co.ke/news/177516/whistleblowers-to-get-stronger-protection-rewards-under-new-bill.

- Ku dhiirigeli Ismaamulka Nairobi inay bixiso deeqo la mid ah kuwa la uruuriyay oo la siiyo ururrada bulshada rayyidka ah ee ka shaqeeya ka hortagga dembiyada.
- Samee dhaqaalaha saameynta badbaadada bulshada oo ay ka qeyb qaataan la howlgalayaasha waaxda gaarka loo leeyahay, kaas oo siiya ururrada bulshada rayyidka ah amaahyo leh riba hooseyso si ay u hirgeliyaan mashaariic la ballaarin karo.
- Dhiirigeli uruurinta lacagaha dadweynaha si loo hirgeliyo howlaha, taaso yareynaysa ku tiirsanaanta deeq-bixiyeyaasha.

### Hirgeli habab ilaalin oo xooggan oo loogu talogalay ururrada bulshada rayyidka ah

- Saxiix hab-maamuska ilaalinta ee u dhexeeya booliska, Guddiga Isku-dubbaridka Hay'adaha Aan Dowliga Ahayn (NGOs) iyo isbaheysiga ururrada bulshada rayyidka ah ee maxalliga oo dammaanad qaadaya xorriyadda dhaqdhaqaaqa iyo jawaab degdeg ah oo ku aaddan khatarraha.
- Dhaqdhaqaaqayaasha sii tababar ku saabsan amniga dhijitaalka, oo daboolaaya isgaarsiinta qarsoon, keydinta xogta amniga leh iyo xeeladaha ka hortagga dabagalka.

## 5. Isbeddelka cimillada iyo amni darrada la xiriirta

Barakaca ka dhasha isbeddelka cimiladu wuxuu kordhiyaa tirada muhaajirinta nugul, kuwaas oo wajahaaya ka faa'iideysi iyo tacaddiyo ay sii xumeynayaan in aysan heysanin dukumeentiyo aqoonsi, hoy ammaan ah, iyo taageero bulsho. Tan ayaa ka dhigeysa in ay si muuqata uga muuqanin nidaamyada dowladda, taas oo u horseedda inay halis weyn ugu jiraan inay dhibbane u noqdaan ama ay ka faa'iideystaan kooxaha dembiyaha abaabulan.

Inkastoo bulshada rayyidka kaalin weyn ka qaadato in ay muhaajirinta siiso taageero, oo ay ka mid yihiin kuwa ay isbeddelka cimilada barakicisay, haddana ururrada bulshada waa inaysan qaadin culeyska oo dhan. Dowladda waa inay xoojiso awoodda adeegyada bulshada ee jira si ay u maareyso qulqulka muhaajirinta iyo inay horumariso isku-dubbaridka u dhexeeya ismaamulka iyo hay'adaha qaranka.

### Hirgeli tallaabooyin lagu aqoonsanaayo laguna siinaayo taageero degdeg ah dadka soo galootiga ah ee cusub

- Taageer wacyigelin ay bulshadu hoggaaminayso si loo aqoonsado dadka cusub ee soo gala bulshada.
- Saldhigga basaska ee Eastleigh ka aas-aas xarun soo dhoweyn iyo qiimeyn – taasi oo ay si wadajir ah u maamuli karaan hay'adaha dowladda, ururrada caalamiga ah, iyo ururrada bulshada rayyidka ah. Xaruntu ha bixiso qiimeynta nuglaanshaha, gudbinta adeegyada hoyga, iyo helitaanka adeegyada sharci iyo caafimaad.

### Samee barnaamijyo isku dhafan oo lagu bixiyo ilaalin iyo taageerada hab-nololeedka bulshada dadka soo galootiga ah

- Samee hindise lagu xaqiijinaayo hoy ammaan ah. La shaqee barnaamijyada qaran ee guriyeynta si loo dhiso guryo kiradoodu jaban tahay, iyadoo mudnaan la siinaayo qoysaska ay barakicisay isbeddelka cimilada. Sidoo kale, in la hirgeliyo kabitaanka kirada.
- La shaqee ururrada aan dowliga ahayn (NGOs) si loo abuuro loona xoojiyo adeegyada si fudud loo heli karo, kana turjumaaya dhaqanka iyo baahiyaha bulshada, kuwaas oo ay ku jiraan adeegyada taageerada caafimaadka dhimirka.
- Hirgeli xarumo lagu xoojinaayo adkeysiga bulshada ee magaalooyinka ku nool, iyadoo lagu hirgelinaayo hoolalka bulshada, oo lagu barto luuqadaha, lagu kobciyo aqoonta dhijitaalka ah, lagu bixiyo taageero nafsi iyo bulsho, iyo adeegyada daryeelka carruurta.
- Howlgeli rugo sharci oo guurguura kuwaas oo gaara degsiimooyinka aan rasmiga ahayn si ay uga caawiyaan helitaanka dukumeentiyada aqoonsiga, xuquuqda shaqaalaha iyo tacaddiyada ka dhanka ah jinsiga.

KU SAABSAN GLOBAL INITIATIVE

The Global Initiative Against Transnational Organized Crime waa shabakad calami ah oo leh 800 oo Khubarro oo adduunka oo dhan ku nool. The Global Initiative wuxuu bixiyaa goob lagu horumariyo doodo ballaaran iyo habab cusub oo aas-aas u ah istraatijiyad caalami ah oo loo dhan yahay oo ka dhan ah dembiyada abaabulan.

**www.globalinitiative.net**